# HINDISE SHARCIYEEDKA CADDAALADDA DA'YARTA SOOMAALIYEED

WASAARADA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA

## Contents


CUTUBKA KOOWAAD ..... 4

QODOBO GUUD ..... 4

Qodobka 1aad ..... 4

**Magaca Sharciga** ..... 4

Qodobka 2aad ..... 4

**Ujeeddada Sharciga** ..... 4

Qodobka 3aad ..... 4

**Baaxadda Sharciga** ..... 4

Qodobka 4aad ..... 5

**Qeexid** ..... 5

Qodobka 5aad ..... 6

**Danaha ugu Wanaagsan ee Da'yarta** ..... 6

Qodobka 6aad ..... 7

**Ilaalinta Sirta** ..... 7

Qodobka 7aad ..... 7

**Da'da Mas'uuliyadda Fal-dembiyeedka** ..... 7

Qodobka 8aad ..... 7

**Maxkamadda Da'yarta** ..... 7

Qodobka 9aad ..... 8

**Qaab-dhismeedka Maxkamadda Da'yarta** ..... 8

Qodobka 10aad ..... 8

**Awoodda Maxkamadda Da'yarta** ..... 8

Qodobka 11aad ..... 8

**Rafcaanka** ..... 8

Qodobka 12aad ..... 9

**Kaaliyeyaasha Maxkamadda** ..... 9

CUTUBKA LABAAD ..... 10

HAB-RAACA CADAALADDA ..... 10

Qodobka 13aad ..... 10

**Booliska Da'yarta** ..... 10

Qodobka 14aad ..... 10

**Waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Laanta Booliska Da'yarta** ..... 10

Qodobka 15aad ........ 11
**Xiritaan** ........ 11
Qodobka 16aad ........ 11
**Gacan-ku-hayn** ........ 11
Qodobka 17aad ........ 11
**Xaqa La-talinta Sharci** ........ 11
Qodobka 18aad ........ 12
**Weydiimo** ........ 12
Qodobka 19aad ........ 12
**Xuquuqda Waalidka** ........ 12
Qodobka 20aad ........ 12
**Shuruudaha Gacan-ku-hayn** ........ 12
Qodobka 21aad ........ 13
**Dhegaysiga Hordhaca ah** ........ 13
Qodobka 22aad ........ 13
**Ujeeddada Dhegaysiga Hordhaca ah** ........ 13
Qodobka 23aad ........ 13
**Qiimeynta Da'da** ........ 13
CTUBKA SADDEXAAD ........ 15
HAB-RAACA MAXKAMADDA ........ 15
Qodobka 24aad ........ 15
**Awoodaha Gaarka ah** ........ 15
Qodobka 25aad ........ 15
**Hor-imaanshaha Maxkamadda Da'yarta** ........ 15
Qodobka 26aad ........ 15
**Furitaanka Maxkamadeynta** ........ 15
Qodobka 27aad ........ 16
**Caddeyn** ........ 16
Qodobka 28aad ........ 16
**Hab-raaca Xukunnada** ........ 16
Qodobka 29aad ........ 16
**Asaasidda Xarumo Dhaqan-celin ee Da'yarta** ........ 16
Qodobka 30aad ........ 17

**Mas’uuliyadda Xarumaha Xaqiijinta Cadaaladda Da’yarta (Heerka 1aad)** ........ 17
Qodobka 31aad ........ 17
**Mas’uuliyadda Xarumaha Dhaqan-celinta ee Da’yarta (Heerka 2aad)** ........ 17
CUTUBKA AFRAAD ........ 18
QODOBBO KAMA-DANBEYS AH ........ 18
Qodobka 32aad ........ 18
**Weecin** ........ 18
Qodobka 33aad ........ 18
**Noocyada Weecinta** ........ 18
Qodobka 34aad ........ 18
**Mudnaanta Weecinta** ........ 18
Qodobka 35aad ........ 19
**Arrimaha Tixgelinta Mudan** ........ 19
Qodobka 36aad ........ 19
**Xeernidaamiyeyaal** ........ 19
Qodobka 37aad ........ 19
**Baabi’in** ........ 19
Qodobka 38aad ........ 19
**Dhaqan- gal** ........ 19

# CUTUBKA KOOWAAD
# QODOBO GUUD

Qodobka 1aad

## Magaca Sharciga

1. Sharcigan waxaa lagu Magacaabaa "Sharciga Cadaaladda Da'yarta Soomaaliyeed".
2. Sharcigani wuxuu ku saleysan yahay raad-raac iyo wax-ka-beddel lagu sameeyey Sharciyadii hore ee Cadaaladda Da'yarta Soomaaliyeed, sida "Sharci Lr. 13, ee soo baxay 8dii Maarso 1970" ee Maxkamadda Da'yarta iyo Dhaqan-celinta.

Qodobka 2aad

## Ujeeddada Sharciga

1. Asaasidda wada-shaqeyn cad oo ku salaysan sharci iyo hab-raacyo daboolaya haynta, qabashada, dacweynta, dhaqan-celinta, ciqaabta ama xabsiyeynta Da'yarta gudaha dalka Soomaaliya.
2. In la hubiyo in Sharcigani uu waafaqsanyahay shareecada islaamka , Datuurka dalka, shuruucda kale ee dalaka u yaala  iyo mabaadi'da asaasiga ah ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Carruurta ee soo baxay 1989.
3. In la qaddariyo culeyska maskaxda iyo midda jirka ee Da'yarta, lana siiyo adeegyo dheeraad ah si loo ilaaliyo Xuquudooda.
4. In lagu dhiirri-geliyo Da'yarta is-dhex-galka bulshada taasoo muhiim u ah dhaqan-celintooda.
5. In la asaaso xarumo dhaqan-celin gaar ah oo lagu xanaaneeyo Da'yarta maxkamdeynta ka hor iyo ka dib.

Qodobka 3aad

## Baaxadda Sharciga

1. Sharcigani waxaa lagu dabaqayaa oo uu saameynayaa dhammaan Da'yarta ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Sharcigan wuxuu dhawrayaa Xuquuqda sharciga islaamku siiyay Da'yarta si aan kala-sooc lahayn ee ku aaddan waalidka dhalay, daryeelaha sharciga ah, midab, jinsi (lab/dheddig), luqad ama lahjad, siyaasad ama ra'yi kale, qowmiyad, qabiil ama asal, hanti (dabaqad dhaqaale), baahiyaha gaarka ah, xaalad caafimaad, dhalasho, mansab ama xaalad kale oo kala-sooc ama takoor ku saleysan.

Qodobka 4aad

## Qeexid

**"Carruur**" waxaa loola jeedaa qof ka yar 15 (shan iyo tobon) sano sida ku xusan Qod. 29aad (8) ee Dastuurka Ku-meel-gaarka (KMG) ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS) iyo Heshiiska Caalamiga ah ee Xaquuqda Carruuta ee soo baxay 1989;

**"Xanaaneeye/Daryeele"**waxaa loola jeedaa qofka leh mas'uuliyadda xuquuqda gacan-ku-haynta iyo xanaaneynta carruurta ama Da'yarta;

**"Maxkamadda Da'yarta"** waxaa loola jeedaa Maxkamad gaar ah oo loogu talo-galay Da'yarta ka yar 18 (siddeed iyo tobon) sano, si fal-dembiyeedyada ay galaan loogu qaado, taasoo ku xusan Xeer Lr.13 ee soo baxay 1970 iyo sidoo kale Qodoka 40aad ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xaquuqda Carruurta, Maxkamadaas oo si buuxda awood ugu leh dhegaysiga dacwadaha lidka ku ah qof kasta oo da'diisu ka yar tahay 18 sano;

**"Da'yar"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo ay da'diisu gaartay 14 sano, kana yar tahay 18 (siddeed iyo tobon) sano;

**"Danaha ugu wanaagsan ee Da'yarta"** waxaa loola jeedaa go'aan kasta oo laga gaaro da'yar, si loo hubiyo fulinta xuquuqdiisa asaasiga ah iyo baahiyihiisa gaar ahaaneed, aqoonsiga xaaladiisa bulsho iyo koritaanka jireed, maskaxeed iyo hormarinta waxbarshadiisa, waxaana la tixgalinayaa mar kasta danta ugu habboon ee Da'yarta;

**"Qoys"** waxaa loola jeedaa sida waafaqsan ujeeddada Sharcigan; Aabe, Hooyo, Walaal, Awoowe iyo Ayeeyo;

**"Qaraabo"** waxaa loola jeedaa, sida waafaqsan ujeeddada Sharcigan qaraabada ilaa darajada 4aad.

**"Fal-dembiyeed Culus"** waxaa loola jeedaa fal-dembiyeed lagu muteysan karo ciqaabta ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS) ama sharci kasta oo dhaqan-gal ah, kaasoo tilmaamaya ciqaab ka badan 3 (saddex) sano;

**"Jebinta Sharciga Da'yarta"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo ay da'diisu gaartay 14 (afar iyo) sano, kana yar tahay 18 (siddeed iyo tobon) sano; oo la horkeeno garsoore, ka dib markii lagu tuhmay ama lagu eedeeyey inuu galay fal-

dembiyeed lagu muteysanayo ciqaab si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS);

**"Laanta Booliska Da'yarta" w**axaa loola jeedaa Xarunta Booliska ee Da'yarta oo u xilsaaran in ay la dhaqanto dhammaan dacwooyinka khuseeya Da'yarta lagu soo eedeeyo in ay galeen fal-dembiyeedyo lid ku ah Sharcigan;

**"Sarkaalka Ilaalinta"** waxaa loola jeedaa sarkaalka ilaalinta Maxkamadda Da'yarta oo u xilsaaran qiimeynta Da'yarta ku xad-gudubta Sharcigan;

**"Ra'yiga Da'yarta"** waxaa loola jeedaa in la dhegaysto Da'yarta loona oggolaado Xaquuqda ay u leeyihiin in ay la hadlaan hay'adaha fulinta sharciga hortooda;

**"Xarunta Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta"** waxaa loola jeedaa Xarun ka mid ah Xarumaha Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda Cadaaladda oo mas'uul ka ah ilaalinta Cadaaladda Da'yarta waxaana laga furayaa Degmo kasta.

**"Dhegaysi Hordhac ah"** waxaa loola jeedaa dhegaysi uu sameeyo Garsooraha Maxkamadda Da'yarta marka ugu horreysa ee Dacwad Da'yarta la soo gaarsiiyo Maxkamadda; iyo

**"Baahiyaha Gaarka ah"** waxaa loola jeedaa qof kasta oo qaba xanuun ama duruuf gaar ah oo waajibinaysa in la siiyo daryeel gaar ah sida; naafo, dhegool ama indhool.

**"Wasaaradda"** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka.

**"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka.

**"Weecin"** waxaa loola jeedaa in la siiyo eedaysanaha Da'yarta ah fursad lagu weecinaayo hab-raaca nidaamka garsoorka rasmiga ah sida ugu wanaagsan danta da'ayartu ku jirto.

## Qodobka 5aad

## Danaha ugu Wanaagsan ee Da'yarta

1. Danaha ugu wanaagsan ee Da'yartu waa in tixgelin weyn la siiyo marka tallaabo sharci laga qaadayo ama go'aan laga gaarayo Da'yarta si waafaqsan Sharcigan.
2. Da'yarta waa in la dhegaysto si ay u muujiyaan waxa maankooda ka guuxaya iyo dareenkooda ku aaddan arrinta mar kasta laga wareysanayo.

Qodobka 6aad

## Ilaalinta Sirta

1. Ilaalinta sirta Da’yarta fal-dembiyeedyada gasha ama lagu soo eedeeyo iyo kuwa dhibbanayaasha ah waa in la dhawro heer kasta oo la joogo.
2. Macluumaad kasta oo wax u dhimaya ama suurta-gelinaya in la aqoonsado Da’yarta xad-gudubyada gasha ama lagu soo eedeeyey iyo kuwa dhibbanayaasha ah lama faafin karo.
3. Macluumaadka shakhsiyadeed ee Da’yarta gasha xad-gudubyada iyo kuwa dhibbanayaasha ah, waa in si adag loo dhawraa isla markaasna aan loo oggolaan cid saddexaad, haddii aysan dhinacaas si toos ah u khuseyn dacwadda ama aysan amrin cid awood u leh bixinta macluumaadkaas.

Qodobka 7aad

## Da’da Mas’uuliyadda Fal-dembiyeedka

1. Haddii uusan gaarin qofka Caruurta ah 14 (afar iyo toban) sano oo ah waqtiga fal-dembiyeedka da’yartu gali karo, ma qaadayo mas’uuliyad fal-dembiyeed.
2. Da’yar kasta oo gaaray da’da 14 (afar iyo toban) sano balse aan gaarin 18 (sideed iyo toban) sano, wuxuu leeyahay mas’uuliyad fal-dembiyeed, balse ma lahan mas’uuliyad buuxda oo fal-dembiyeed.
3. Cid kasta oo gaartay da’da 18 (siddeed iyo toban) sano waqtiga faldembiyeedku dhacay, waxaa loo aqoonsan yahay qaan-gaar. Sidaas darteed, wuxuu lahaanayaa mas’uuliyad buuxda oo uu ku qaado fal-dembiyeed mana ahan qof da’yar ah.
4. Mas’uuliyadda qaadidda fal-dembiyeedka Da’yarta waxaa keliya oo go’aamin kara Maxkamad awood u leh iyadoo raacaysa hab-raaca Sharciyada dalka iyo Sharcigan.

Qodobka 8aad

## Maxkamadda Da’yarta

1. Maxkamadaha darajada kowaad iyo labaad waxay yeelanayaan qeybta Da’yarta.
2. Qeybaha Da’yartu waxay qaadayaan dhammaan dacwadaha khuseeya qof kasta oo da’yar ah.

3. Qeybta Da'yartu waxay dabaqaysaa Shareecada islaamka,Qodobbada Sharcigan, Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeerka Ciqaabta iyo Xeerka Habka Ciqaabta.

Qodobka 9aad

## Qaab-dhismeedka Maxkamadda Da'yarta

Maxkamadda Da'yarta ee darajada kowaad iyo labaad waxay ka koobnaanaysaa Gudoomiyeyaasha maxkamadaha labada heer, iyaga keliya ayaana qaadaya dhammaan kiisaska la xiriira Da'yarta.

Qodobka 10aad

## Awoodda Maxkamadda Da'yarta

1. Dhammaan Dacwadaha Da'yartu waxay ka bilaabanayaan Qeybta Da'yarta ee Maxkamadda Degmada ay khuseyso.
2. Qeybta Da'yarta ee Maxkamadda Degmadu waxay awood buuxda u leedahay qaadidda fal-dembiyeedyada Ciqaabtoodu ku xaddidan tahay awoodda Maxkamadda Degmada ee ku xusan Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeerka Ciqaabta iyo Xeerka Habka Ciqaabta iyo Shareecada islaamka
3. Dhammaan Dacwadaha kale oo ciqaabtoodu dhaafsiisan tahay awoodda Maxkamadda Degmada, waxay ka bilaabanayaan Qeybta Da'yarta ee Maxkamadda Gobolka.

Qodobka 11aad

## Rafcaanka

1. Da'yar kasta oo ay xukuntay Maxkamadda darajada kowaad, wuxuu rafcaan u qaadan karaa Maxkamadda Racfaanka ee awoodda u leh, go'aankeedu wuxuu noqonayaa mid kama-dambeys ah.
2. Rafcaannada laga qaadanayo xukunnada Da'yarta waa inay waafaqsan yihiin qodobbada Sharcigan iyo Xeerka Habka Ciqaabta.

Qodobka 12aad

## Kaaliyeyaasha Maxkamadda

1. Garsooraha Maxkamadda Da'yarta ayaa u xil-saaraya Dacwadda Da'yarta 2 (labo) kaaliye isagoo tixgelinaya dabeecadda fal-dembiyeedka ee Da'yarta lagu soo eedeeyey, lana tashanaya wakiilka sharci ee eedaysanaha.
2. Waxaa waajib ku ah Garsooraha in uu kaaliyeyaasha ku wargeliyo taariikhda, waqtiga iyo goobta dhegaysiga Dacwadda Maxkamadda 7 (toddobo) maalmood ka hor.
3. Liiska kaaliyeyaasha waxaa laga soo qaadanayaa liis magacyo kaaliyeyaal hore loo ansixiyey, isla markaana uu dib-u-eegis ku sameeyey Golaha Adeegga Garsoorka.

## CUTUBKA LABAAD
## HAB-RAACA CADAALADDA

### Qodobka 13aad

### Booliska Da'yarta

1. Saldhig boolis oo kasta waa in laga abuuro oo laga helaa "Laanta Booliska Da'yarta" oo gaar ah.
2. Laanta Booliska Da'yarta waxaa magacaabaya Taliyaha Guud ee Booliska, isagoo wada-tashi la sameeyey Wasiirka Amniga Gudaha.

### Qodobka 14aad

### Waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Laanta Booliska Da'yarta

1. Laanta Booliska ee Da'yarta waxaa xil ka saaran yahay hawlahan soo socda:

b) la-tacaamulka (maamulidda) dacwadaha khuseeya Da'yarta ku xad-gudubta sharciga iyo kuwa u baahan in la dhawro, baarista fal-dembiyeedyada ay galaan ama laga galo Da'yarta;

t) inuu ilaaliyo amniga guud, nabad-gelyada iyo kala –danbeynta isagoo u maraya:

- i. ka-hortagga dembiyada caruurta;
- ii. qabashada Da'yarta dembiga gasha;
- iii. baarista dembiyada Da'yarta gasha iyo kuwa iyaga laga galo.

2) In xaqa qarsoodiga iyo asturnaanta ee macluumaadka Da'yarta la dhawro, lana fuliyo.

3) In la dhawro Da'yarta halista ugu jirta in la dhibaateeyo ama looga faa'iideysto qaab sharci-darro ah.

4) In lagala shaqeeyo waalidka/daryeelaha sharci iyo guud ahaan bulshada sidii looga hor-tegi lahaa fal-dembiyeedyada ay ku dhici karaan Da'yarta.

5) Waa in Saraakiisha Laanta Booliska Da'yarta la siiyo tababar gaar ahaaneed iyo aqoon-kororsi joogto ah oo ku saabsan cadaaladda Da'yarta iyo hab-raaca dhawristeeda.

6) Laanta boolisku markay hawshan gudanayso, waxay ku shaqeynaysaa amrka iyo hagidda Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

## Qodobka 15aad

## Xiritaan

1. Sarkaal Boolis wuxuu keliya xiri karaa qof da'diisu gaartay 14 (afar iyo tobon) sano kana yar tahay 18 (siddeed iyo toban) sano, marka ay tahay xalka ugu dambeeya ee la xiriira badbaadadiisa ama amniga bulshada.
2. Sarkaal Boolis wuxuu sidoo kale ku xiri karaa Da'yarta, haddii:
   b) la siiyo amar xiritaan oo sharciga waafaqsan;
   t) da'yarta lagu qabtay isagoo faraha kula jira fal-dembiyeed.

3. Sarkaal Boolis waxaa keliya oo uu adeegsan karaa xoog marka uu fulinayo amar xiritaan Maxkamadeed,

4. Sarkaal boolis ee soo xira da'yar waa inuu si dhaqsi ah ugu wargeliya waalidkiisa qof mas'uul ka ah, ama qareenkiisa.

## Qodobka 16aad

## Gacan-ku-hayn

1. Marka uu qofka Da'yarta ah galo gacan-ku-haynta Sarkaal Boolis ah, waa inuu ogeysiiyaa waalidkiisa/daryeelihiisa iyo xafiiska cadaaladda caruurta ee Wasaaradda, waana in uu si qayaxan iyo luqad fudud ugu sharaxaa sababta hayntiisa, waana in uu si dhaqso ah Sarkaalku u geeyo Xarumaha lagu hayo Da'yarta.
2. Sarkaalka Booliska waa in uu ku war-geliyaa Da'yarta dhammaan xuquuqdiisa inta uu ku sugan yahay gacan-ku-haynta booliska iyo in uu siiyo macluumaad dhammeystiran oo ku qoran luqadda uu eedaysanuhu fahmayo.
3. Waa in loo keenaa tarjumaan ku habboon Da'yarta qabta baahiyaha gaarka ah.

## Qodobka 17aad

## Xaqa La-talinta Sharci

1. Da'yarta la-hayo waa in lagu war-geliyaa xaqa uu u leeyahay la-talin sharci (Qareen) oo lacag-la'aan ah si degdeg ah, sida ku cad Qodobka 29aad (5) ee Dastuurka Ku-meel-gaarka (KMG) ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS) iyo sida ku xusan sharciga Kaalmo sharciyeedka.

2. Da'yarta waxba lama su'aali karo, iyadoo uu maqan yahay waalidka/daryeelaha, la-taliye sharci (Qareen) ama turjumaan Da'yarta qabta baahiyaha gaarka ah.
3. Si gaar waxaa ugu xilsaaran xaqa la-talinta sharci ee Da'yarta xafiiska Cadaaladda Caruurta ee Wasaaradda.

## Qodobka 18aad

### Weydiimo

1. Sarkaalka booliska wuxuu wax su'aali karaa Da'yarta oo keliya marka ay joogaan waalidka/daryeelaha ama la-taliye sharci (Qareen) ama tarjumaan ku habboon kuwa qaba baahiyaha gaarka ah.
2. Sarkaalka booliska ah ee wax su'aalaya Da'yarta waa in uusan u muuqan cadow xilliga su'aalaha.
3. Da'yarta waa in wax loo su'aalaa qaabka ugu wanaagsan oo ay ku caddeyn karaan fikradahooda

## Qodobka 19aad

### Xuquuqda Waalidka

1. Waalidka iyo daryeelaha sharciyeysan waxay xaq u leeyihiin in lagu wargeliyo gacan-ku-haynta da'yartooda sida ugu dhaqsaha badan
2. Haddii ay dhacaan hab-raacyo Maxkamadaynta ka hor, waa in waalidka ama daryeelaha sharciga ah lagu wargeliyaa ka hor baarista iyo hab-raacayada dhegaysiga dacwadda.

## Qodobka 20aad

### Shuruudaha Gacan-ku-hayn

1. Da'yarta waxaa gacan-ku-hayn lagu sameyn karaa marka ay noqoto gacan-kuhayntu xal kama-dambays ah.
2. Wasaaraddu waxay asaasaysaa Xarunta Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta oo lagu haynayo Da'yarta Maxkamadaynta ka hor taasoo u gaar ah Da'yarta.
3. Xarumaha Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta, waxaa kormeeraya Wasiirka si loo ilaaliyo xuquuqda Da'yarta inta gacanta lagu hayo.
4. Da'yarta waa in lagu siiyaa Xarunta dhawris iyo amni ka hor inta aan la maxkamadayn ama aan la sii-deyn.
5. Inta lagu hayo Da'yarta xarunta Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta, waxaa la diyaarinayaa warbixinno shakhsi ah, raad-raacyo iyo qiimeyn ku saabsan

Da'yarta inta uu ku jiro gacan-ku-haynta, iyadoo loo gudbinayo Maxkamadda Da'yarta.

6. Xarunta Xaqiijinta Cadaaladda Da'yartu maxkamadaynta ka horta waa in ay hubisaa in dhammaan Da'yarta loola dhaqmay si sharaf iyo ixtiraam leh.
7. Xarunta maxkamadaynta ka hor Da'yarta lagu hayo, waa in lagu maamulaa si waafaqsan qodobbada Sharcigan iyo sharci kasta oo kale oo u dhigma Sharcigan, waxaana ka hawl-galaya dad takhasus gaar ah u leh baxnaaninta iyo daryeelka Da'yarta.

Qodobka 21aad

**Dhegaysiga Hordhaca ah**

1. Dhegaysiga hordhaca ah, eedaysanaha Da'yarta waa in uu ka-jawaab-celiyaa eedaymaha loo haysto.
2. Dhegaysigaas hordhaca ah waa in loo tixgaliyo in ay tahay markii kowaad oo maxkamad la hor-geeyo Da'yarta.

Qodobka 22aad

**Ujeeddada Dhegaysiga Hordhaca ah**

Ujeeddada dhegaysiga hordhaca ah waa in:

b) la darso heerka caddeynta lidka ku ah eedaysanaha iyo in dacwadda la horgeyn karo maxkamad;

t) loo tilmaamo qaabka kale oo ku habboon in loo weeciyo eedaymaha Da'yarta loo haysto; iyo

j) in Garsooruhu uu qaado dacwadaha si dadban(waxa lagu dhamayn karaa Heshiis labada dhinac ay gaaraan)

Qodobka 23aad

**Qiimeynta Da'da**

1. Haddii aysan jirin dokumenti laga hayo da'da dhalashada eedaysanaha, garsooraha dhegaysiga hordhaca ah ee Maxkamadda Da'yarta wuxuu amrayaa in la sameeyo qiimeynta da'da sida ugu dhaqsaha badan.

2. Maxkamadda Da’yartu waxay tixgelinaysaa go’aaminta da’da ku saleysan ee baaritaannada caafimaadka.

## CTUBKA SADDEXAAD

### HAB-RAACA MAXKAMADDA

Qodobka 24[aad]

**Awoodaha Gaarka ah**

1. Maxkamadda Da'yarta ee lagu asaasay si waafaqsan Qodobka 8[aad] ee Sharcigan, waxay lahaanaysaa awood buuxda ama gaar ah oo ay ku dhegaysato dhammaan dacwadaha la xiriira Da'yarta heerarkeeda kala duwan waxayna awood u leedahay go'aan ka-gaarista eedaymaha Da'yarta lagu soo oogay si madax-bannaan.

Qodobka 25[aad]

**Hor-imaanshaha Maxkamadda Da'yarta**

Qaababka loo xaqiijinayo imaanshaha Da'yarta ee Maxkamadda waa sidan:

b) xabsi-ku-hayn;

t) amar in uu yimaado Maxkamadda horteeda;

j) u-yeeritaan Maxkamadeed; iyo

x) haddii lagu qabto isagoo gacanta kula jira xad-gudubyo ku tilmaaman Qodobka 35[aad] ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed (XHCS) ama fal-dembiyeedada culus lagu qeexay sharciyada kale ee dalka.

Qodobka 26[aad]

**Furitaanka Maxkamadeynta**

1. Maxkamaddu waxay ugu sharraxaysaa Da'yarta luqad sahlan nuxurka fal-dembiyeedka lagu soo eedeeyey ama waxay adeegsaneysaa turjumaan haddii ay jirto baahi gaar ah.
2. Maxkamaddu waxay weydiinaysaa Da'yarta wuxuu doonayo inuu yiraahdo oo sharraxaad ah iyo haddii uu qabo sabab kasta oo uu ku muujinayo inaan dacwadaas lagu qaadin.
3. Haddii hadal-qiraalka uu bixiyey da'yartu noqdo inuu qirto fal-dembiyeedka, ka dib marka lasoo mariyo xaqiijinta loo baahan yahay, Maxkamaddu waxay awoodaa inay xukun ku rido

## Qodobka 27$^{aad}$

### Caddeyn

1. Maxkamaddu waxay markhaatiga weydiinaysaa su'aaalaha ay u aragto inay yihiin lama-huraan ama ku habboon si looga gun-gaari karo runta ama sida kale ee loo xaqiijin karo eedaynta ama in la hubiyo markhaatiga.
2. Marka markhaatiyada dacwad-oogaha ay bixiyaan caddeyntooda Maxkamadduna ay ku qanacdo caddeymaha la hor-keenay, iyagoo si habsami leh u caddeeyey dacwadda lidka ku ah eedaysanaha, taasoo haddii aan laga jawaabin noqonaysa mid ka maran shaki kasta oo meel-mar ah oo uu ku noqonayo dembiile Da'yarta, Maxkamaddu waxay dhegaysanaysaa markhaatiyaasha difaaca iyo hadal-qiraal kasta oo dheeraad ah ee uu eedaysanuhu door-bidayo inuu u adeegsado difaaciisa

## Qodobka 28$^{aad}$

### Hab-raaca Xukunnada

1. Haddii ay Maxkamaddu ku qanacdo in fal-dembiyeedyada la caddeeyey, iyadoo helaysa macluumaadka la xiriira akhlaaqda, tixraaca taariikh- nololeedka, nolol-guriyeedka, meheradda iyo caafimaadka eedaysanaha, Maxkamaddu waxay xukun ku ridaysaa Da'yarta, si ay ugu suurta-gasho maxkamadda inay la tacaamusho dacwadda sida ugu wanaagsan oo ay ku jirto danaha Da'yarta.
2. Xabsiyeyntu waxay noqonaysaa goobta Da'yarta lagu dhaqan-celinayo.
3. Xukunnada lagu ridayo Da'yarta waa inay waafaqsan yihiin Qodobbada Sharcigan iyo Xeerka Habka Ciqaabta.

## Qodobka 29$^{aad}$

### Asaasidda Xarumo Dhaqan-celin ee Da'yarta

1. Wasaaradda waxaa xil ka saaran yahay asaasidda xarumaha dhaqan-celin ee Da'yarta sida ugu suurta-galsan ee awooddu saamaxayso, waxaana asaasidda xarunta dhaqan-celinta Da'yarta dikreeto ku soo-saaraya Wasiirka.
2. Xarumaha dhaqan-celinta Da'yarta waxay kala yeelanayaan labo heer oo kala ah: b) **heerka kowaad**: maxkamadeynta ka hor waxaa Da'yarta lagu haynayaa Xarunta Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta, waxaana loo sameynayaa Xeernidaamiye gaar ah oo lagu maamulo

t) **heerka labaad**: maxkamadeynta ka dib waxaa Da'yarta lagu haynayaa Xarumo dhaqan-celin gaar ah, waxaana loo sameynayaa Xeer-nidaamiye gaar ah oo lagu maamulayo.

### Qodobka 30aad

### Mas'uuliyadda Xarumaha Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta (Heerka 1aad)

Sarkaalka mas'uulka ka ah Xarumaha Xaqiijinta Cadaaladda Da'yarta (Heerka 1aad) wuxuu mas'uul ka yahay arrimaha hoos ku xusan:

b) siinta Maxkamadda Da'yarta, Xeer-ilaalinta iyo Wasaaradda Cadaaladda warbixin qoraal ah oo koobeysa xad-gudubka ama xad-gudubyada lagu soo oogay iyo akhlaaqda eedaysanaha Da'yarta ah;

t) ka-war-haynta iyo kormeerka is-beddel kasta oo uu sameeyo garsooraha Maxkamadda Da'yarta iyo Laanta Booliska Da'yarta;

j) iskuduwidda iyo kala-shaqeynta waalidka, Da'yarta, booliska iyo hawl-wadeennada bulshada arrimaha la xiriira Da'yarta; iyo

x) fulinta hawl kasta oo ay amarto Maxkamadda Da'yarta iyo amarrada maamul ee Wasaaradda Cadaaladda.

### Qodobka 31aad

### Mas'uuliyadda Xarumaha Dhaqan-celinta ee Da'yarta (Heerka 2aad)

Xarumaha dhaqan-celinta Da'yarta (Heerka 2aad) waxaa xil ka saaran yahay:

b) xaqiijinta in Da'yarta lagu hayo meel ka gooni ah dadka waaweyn;

t) dhaqan-celin-ku-sameynta Da'yarta si ay ugu suurta-gasho in ay dib ula qabsadaan bulshada oo u noqdaan xubno waxtar u leh bulshada;

j) bixinta dhawrid, waxbarasho iyo tababar la siiyo Da'yarta inta ay ku jiraan dhaqan-celinta;

x) horumarinta iyo dhiirri-gelinta iskaashiga u dhexeeya wasaaradaha iyo waaxyaha ee ku aaddan ujeeddooyinka lagu xaqiijinayo in la siiyey Da'yarta daryeelo ku filan oo ku habboon, dhawrid iyo adeegyo hufan;

kh) dhiirri-gelinta caafimaadka, is-ixtiraamidda iyo amni ay da'yartu ku helaan xaruntooda; iyo

d) qabashada mas'uuliyadaha kale ee lagu siiyey Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyeyaasha gaarka ah si ay u gaarto ujeeddooyinkeeda.

## CUTUBKA AFRAAD
## QODOBBO KAMA-DANBEYS AH

Qodobka 32aad

**Weecin**

1. Ujeeddada weecinta waa in la siiyo eedaysanaha Da'yarta ah fursad looga weecinaayo hab-raaca nidaamka garsoorka rasmiga ah sida ugu wanaagsan danta da'ayartuna ku jirto.
2. Weecinta waxay imaan kartaa marka la doonayo in loo sameeyo Da'yarta arrimahan soo socda:
   b) tixgelinta baahiyaha Da'yarta; iyo
   t) dhiirri-gelinta dib-u-dhexgalkiisa bulshada.

Qodobka 33aad

**Noocyada Weecinta**

1. Garsooraha Maxkamadda Da'yartu wuxuu awood u leeyahay in uu amro hal ama ka badan oo weecin sida:

   b) "**amar tegid dugsi qasab ah**" waxaa loola jeedaa amar looga doonayo Da'yartu inuu tago dugsi maalin kasta ee waqti muddo go'an, tegidaas oo uu kormeerayo qof u gaar ah oo la ogyahay;
   t) "**amar akhlaaq-wanaag**" waxaa loola jeedaa warqad amar ay ku qoran tahay heshiisyo u dhexeeya Da'yarta, qoyskiisa iyo Maxkamadda. Da'yartu waa inuu ku dhaqmaa qodobbadan;
   j) "**amar xabsi-guri ku-hayn**" waxaa loola jeedaa Da'yarta in ay ku sugnaadaan hoyga muddo la isku waafaqay; iyo
   x) "**amar warbixin**" waxaa loola jeedaa amar looga baahan yahay Da'yarta inuu isaga warbixiyo cid cayiman, sida dhaqan-celiye, muddo cayiman, si uu ula socdo akhlaaqda Da'yarta.

2. Weecin kasta oo Garsooraha ula muuqata in ay habboon tahay

Qodobka 34aad

**Mudnaanta Weecinta**

Garsooraha waa inuu tixgeliyaa amarka weecinta Da'yarta, haddii ay:

b) tahay markii ugu horreysay ee ay dembi galaan ama fal-dembiyeed ciqaabtiisu aysan ka badnayn 10 (toban) sano;
t) tahay in Da'yarta aqoonsan yahay mas'uuliyadda dembiga uu geystay; iyo
j) tahay in caddeymo ku filan oo lagu xukumo aan loo hayn.

## Qodobka 35aad

### Arrimaha Tixgelinta Mudan

Garsooraha wuxuu tixgelinayaa arrimaha soo-socda marka uu soo saarayo weecinta:

b) qaan-gaarnimada maskaxeed ee Da'yarta;
t) heerka waxbarasho, awoodda garasho, xaaladaha guriga iyo degaanka;
j) da'da Da'yarta;
x) xaaladaha qoyska;
kh) caafimaadka Da'yarta; iyo
d) arrin kasta oo Garsooruhu u arko lagama-maarmaan si meel-mar ah.

## Qodobka 36aad

### Xeernidaamiyeyaal

Wasiirka wuxuu soo saarayaa:

1) Xeer-nidaamiyeyaal lagu hirgelinayo Sharcigan.
2) Hab-raacyo iyo hagitaanno tilmaamaya xilka iyo waajibaadka Xafiiska Cadaaladda Caruurta ee Wasaaradda.

## Qodobka 37aad

### Baabi'in

Sharcigan waxaa lagu baabi'iyey Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin oo la xiriira Arrimaha Cadaaladda Da'yarta.

## Qodobka 38aad

### **Dhaqan- gal**

Sharcigaan waxuu dhaqan galayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka JFS uuna Saxiixo Madaxwaynaha Jumhiiriyada Federaalka Soomaaliya isla markaana lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee dowladda